



Xaaladaha Degdegga ee barafka

Markuu barafka da'ayo, dadka deegaanka waa in ay ka saaraan dhamaan gawaarida wadooyinka Caasimada Hopkins, meelaha gawaarida la dhigto, waddooyinka dhinaca midigta iyo sagxada taaga ah ee la dhigo gawaarido dawlada hoose. Xaalada degdegga barafka waxaa lagu dhawaaqi karaa markuu barafka laba taaka da' o. Xannibaada way sii jiri doonta ilaa wadooyinka gees ka gees laga xaaqayo, meelaha gawaarida la dhigo iyo sagxada taaga ah ee gawaarida dawlada hoose lagu baakimo laga xaaqayo.

Qoto dheerida waxaa lagu cabiraa Hopkins lagamana yaabo inay mar walba lamid noqoto qoto dheerida laga soo sheegay Minneapolis-St. Eelboorka Caalamiga ee Paul. Xaaladaha degdegga barafka Hopkins waxaa loogu dhawaaqi karaa **Leenka Barafka Hopkins, 952-939-1399**. Sidoo kale waxaa lagu baahin karaa Jaanalka 16-aad ee Hopkins Community Cable Channel 16, Twitter, Facebook iyo isgaarsiinta Hopkins.

Warbaahinta maxalliga ah, waxaana ku jiraaan Raadiyaha WCCO-AM iyo Telefishanka WCCO-TV waxaa laga shaaciyaa xaaladaha degdegga barafka; si walboo ay tahay saldhigyadan ma damaanad qaadi karaan in la baahin doono ogaysiiska. Haddaad shakisaan, dadka deegaanka waa in ay soo wacaan Leenka Barafka.

Hadii xaalada deg-degga barafka lagaga dhawaaqo caasimada Hopkins xili galabnimo misa horaanta fiidnimada, **shaqada shaqaalaha hawlaha guud ayaa bilaaban karta wax yar kadib saqda-dhexe kadib, adoo xoojinaayo jiidista gawaarida laga bilaabo 9-ka fiidnimo**. Xaaladaha deg-degga ah ee barafka lagu dhawaaqay 9-ka fiidnimo kadib waxay sababi kartaa in la bilaawo jiidista gawaarida 8-da aroornimo maalinta ku xigta.

Si aad isaga ilaalisid jiidista, dadka meesha degan waa in ay kasoo saaraan gawaarida wadooyinka caasimada iyo meelaha gawaarida la dhigto islamarkii ay maqlaan xaalada deg-degga barafka in lagu dhawaaqay.

Baarkinka xaalada Deg-degga Barafka

Bartamaha Hopkins

- Meesha gawaarida la dhigto ee Maetzold laga bilaabo 1st Street N
- Sagxada gawaarida dawlada hoose lagu baakimo waxay 300 ka xigtaa waqooyiga Beerta Downtown Park waxay ku taalaa Wadada 9th Avenue S
- Sagxada gawaarida lagu baakimo waxay 750 u jirtaa koonfurta Wadada First Street N oo ku taalaa 9th Avenue S



Koonfurta Hopkins

- Bariga Wadada 9th Avenue S iyo waqooyiga Wadada Westbrooke Way taasoo u dhexayso 9th Ave S iyo Nine Mile Creek
- Dhinaca dhamaadka bariga fog 8th Street S agagaarka Togga Valley Park



Buugga Barafka

Hagahaaga amarrada barafka iyo xaaladaha degdegga ah ee barafka gudaha Hopkins

(sidoo kale waxaa laga heli karaa ayagoo Spanish iyo Somali)

www.hopkinsmn.com/488/Snow-Emergencies

Leenka Barafka ee Hopkins
952-939-1399



City of Hopkins

Waaxda Shaqaalaha Dadweynaha

11100 Excelsior Boulevard
Hopkins, MN 55343

952-939-1382

952-939-1381 (Fakis)

www.hopkinsmn.com

Waxaa dib u eegis lagu sameeyay Nofeembar 2019




City of Hopkins

Dhiiri geli. Wax bar. Ku dar. La xiriir.

Qashinka iyo Weelasha dib loo Warshadeeyo

Uruurinta qashinka iyo weelasha dib loo warshadeeyo Caasimada Hopkins waxay u baahantahay nadiifiinta 4 taako caag walba korkiisa mararka qaar barafka dhexdiisa waa la calaamadeeyaa si loogu sameeyo weel walba boos balse tani uma oggolaanayso gacanta otomaatiiga gaariga xamuulka inay gaarto boos ku filan maadaama wadooyinka ay ciriiri noqan karaan barafka isdul fuulaaya awgiisa, waxaa xitaa kasi muhiimsan caag walba korkiisa in la joogteeyo. gaari gacannada lama soo dhigi karo wadada.



Marshi-biyeedyada

Xiliga jiilaalka, waa shaqada ganacsatada iyo deganayaasha Hopkins inay ka saaraan barafka marshi-biyeedyada dadweynaha maraan. Xitaa baraf yar hadduu dao (in ka yar labo taako) wuxuu ku keeni khatar dadka ku socanaaya marshi-biyeedyada.

Qodobka Caasimada Hopkins 820.03 wuxuu u baahanyahay milkiilaha misa qof qalboo degan guri leh marshi-biyeed dadweynaha ay maraan inuu kasaaro barafka 12 sac gudaheed ka dib markuu da'o barafka.

Tani waa muhiim si loo xaqiijiyo badbaadada dadka maraaya marshi-biyeedyada dadweynaha kani. Xeer waa la xoojin doonaa haddii barafka aan oolin. Haddii barafka laga xaaqin 24 sac gudaheed, shaqaalaha caasimada ayaa xaaqaya. Adigana waxaad kasoo hor muuqanaysaa maxkamada sida waafaqsan sharciga. Lacagta waxaa goaamiya Gollaha Caasimada.

Si aad usoo gudbiso marshi-biyeed taxadar khaas ah u baahan, fadlan waxaad soo wacdaa leenka marshi-biyeedka barafka ee 952-548-6315.




Sanduuqyada boostada

Sanduuqyada boostada ee halaabay xiliyada barafka la xaaqayo caasimada ma bedeli doonto ilaa laga arkaaya cadayn muuqata oo tusaysa gawaarida caasimada ee xaaqaa barafka dhaawaca haday sababtay. Hadday Caasimada khaladka yeelato, sanduuqa boostada waxaa lagu bedelayaa mid u dhigma tayadiisa. Caasimafda sidoo kale masuul kama ahan sanduuqyada uu burburiyay culeeska barafka isku dul dul saaran wadada.



Ka dhagayso faariimaha xaaladaha barafka degdegga ah telofoonkaaga www.hopkinsmn.com/255/Emergency-Notification-System.

Aawe gaarigayga? Anigoo Sheeganaayo Gaari Lasoo



Diiwaangelinta ee hadda Meesha lagu xareeya gawaarida xaaladaha deg-degga barafka laga soo jiiday waxay ku taalaa Beerta loo yaqaano 5100 Park Glen Road in St. Louis Park. Macaamiisha waxay soo doonan karaan gawaaridooda kharashkana ay kubixiyaan. meesha gaariga la dhigay.

Haddii gaarigaaga loo xareey sabab aan aheen barafka, wac lambarkan 952-949-0200 si aad u heshid macaluumaad.

Gawaarida loo taga wadooyinka misa meelaha dadweynaha gawaarida dhigtaan xiliyada ay jirto xaalada deg-degga ee barafka digniin ayaa lasiin doonaa waana la jiid doonaa (Hopkins City Code 1305.31, 1305.33). **Haddii gaarigaaga la jiiido**, wac Bobby & Steves Auto World halkan 952-406- 8111 si aad u xaqiijiso meesha gaarigaaga uu yaalo.

Si aad gaarigaaga ugu soo ceshato meesha la dhigay, waxaad u baahnaansaa afartan sheey ee soo socdaan:

- cadaynta lahaanshaha (mid kamid ah subarlogada misa karaka diiwaangelinta ee hadda)
- cadaynta caymiska saxda ah ee gaariga
- liisenka daraawalka gaariga misa karaka aqoonsiga dawlada ay bixisay (hadduu milkiilaha gaariga uusan haysanin liisenka daraawalnimada waxay ku qasbanaan doonaa inuu la imaado daraawal u markhaati kacaaya si gaarigiisa u kaxaysto)
- lacag dhiibid (karaka deenta misa kaash keli ayaa la oggolyahay—haddaad kaash doorbidid, waa inaad keentaa sarifka saxda ah)



Lacagta ugu yar oo gawaarida lagu jiiido

- Jiidista isla hal maalin lagu qaadayo gaariga xamuulka\$130
- Lacagta maamulka 12-ka saacadood ugu ee ugu horreysa ka dib\$25
- Lacag dheeraaad ah oo kaydinta maalinlaha ah kadib 12-ka saacadood ugu horreysa\$35